Somali

Buuga Tabaruca

Waaxda Maamulka Tabaruca

HORUMARINTA ADEEGA AAN SIINO ARDAYDA, SHAQAALAHA IYO QOYSASKA

Soo dhowow adoo mahadsan!

Waan kuugu mahad naqaynaa inaad iskaa wax u qabso ugu shaqayso Dugsiyada Dadwaynaha Seattle. Waxaad u fidisaa gargaar muhiima dugsiyada degmada iyo ardayda, waxaan doonaynaa inaad ogaato inaan qiimayno wakhtigaaga, kartidaada iyo aqoontaad noogu deeqdo.

Hadii aad iskaa wax u qabso ugu shaqayso xafiiska, fasalka ama Xarunta John Stanford ee Tacliinta Qiimaha leh, waxaad qiimo kuleedahay maamuleyaasha, macalimiinta, dugsiyada, qoysaska iyo bulshada dhexdeeda. Kharashka nalaga dhimay dartii waa inaanu waxa yar ee aan helo isku filaysiinaa, sidaa darteed dadka noogu shaqeeya iskaa wax u qabso muhimad dheeraada ayay u leeyihiin ardayda.

Qof kastaa wuxuu nagu caawiyaa si u gaara. Dadka qaar waxay jecel yihiin inay caawiyaan fasalada, qaarna waxay wakhti hayaan fiidkii markay soo rawaxaan. Sidaa saa wakhtigaad nasiisaa muhiim u yahay. Dugsiyadu shaqadan kaligood ma qaban karayaan.

Shaqadanaga waxaan ku hogaaminaynaa himilo cad oo ah in arday kasta dugsiguu doono ha dhigtee helo tacliin heer sare ah. Degmadeenu waxay leedahay heer waxbarasho oo si cad u qeexda waxay ardaydu bartaan, qabana karaan fasal kasta. Waxaan leenahay tabobaro ay raacaan macalimiintu si ay u dhigaan casharo qiimo leh, waxaan kaloo leenahay hab aan u qiimayno sida maamuleyaashu wax u hagaan oo ku salaysan baadhitaanada ugu fiican.

Waxaan ardayda u diyaarinaynaa inay ku najaxaan aduun ka duwan kan aan hada naqaano. Si ay u gaadhaan himiladooda waa in dugsiyadu wax ka badalaan noloshooda. Waa in dugsiyadu u ekaadaan, laga dareemaa una dhaqmaan hab ka duwan siday hore ugu dhaqmi jreen.

Fadlan gacan ka gayso sidaad wax noogala qaban lahayd, sidaan wax u bari lahayn ardayda Seattle. Waad ku mahadsan tahay wax kastood qabato.

Waxaa buugan markii hore qoray Colin Sexton iyo Trisha Matthieu Adeega Tabaruca, 2002; mar labaadkiina 2009 Susan Hall.

John Stanford Center for Educational Excellence
2445 Third Avenue South
Seattle, WA 98134

Adarayska waraaqaha loogu diro Volunteer Management Department
Seattle Public Schools MS 32-150
PO Box 34165
Seattle, WA 98124-1165

Xafiiska ay asalkii kasoo baxday iyo dib u daabicidii sadexaad 2013 (Ronald McGlone): Wixii loo soo jeedinayo ama su'aalo ah ee khuseeya Buugan waa in lagu hagaajiyaa Waaxda Maamulka Tabaruca. rmcglone@seattleschools.org.

Jadwalka buugu ka kooban yahay

Qeexitaanka tabaruca	4
Ujeedada barnaamijka tabaruca ee dugsiyada	5
Ahaanshaha Tabaruce	6
Inaad noqoto Tabaruce	7
Masuuliyada Tabaruceyaasha	8
Xaquuqda Tabaruceyaasha	9
Talooyinka Tabaruceyaasha	10
Heerka Tacliinta	11
Arimaha Amniga iyo Masuuliyada	14
Lashaqaynta Ardayda Dhaqamada kala Duwan	16
Liiska macluumaadka iyo habka tabaruca	17
Heshiiska Tabaruca	18
Lifaaq	19

Tabaruc

Qofka iskaa wax u qabso ku shaqeeyaa waa qof aan lacag lasiin oo hogaanka dugsiyadu ogolaansho u siiyeen si uu shaqo bilaa lacaga ugu qabto dugsiyada degmada. Qofkaasi waa inuu lacag la'aan iyo caymis la'aan ku adeegaa marka laga reebo barnaamijka caymiska shaqaalaha ee degmada lafteedu bixiso. Dadka iskaa wax u qabso ku shaqeeya dhamaantood waxay hoos tagaan Kormeeraha dugsiyada, mana laha wax derajo ah oo u khaasa oo ka baxsan kuwa ku xusan buugan, shaqada ay hayaana waxaa kala noqon kara Kormeeraha ama qof matalaya hadii sidaa la damco, (lifaaqa hoose ka fiiri noocyada shaqo ee iskaa wax u qabso lagaga shaqayn karo)

Booqde:

Marti ama soo booqde waa qof aan lacag lasiin oo degmadu u ogolaatay in uu dugsiyada caawiyo si aan is dabojoog ahayn ama mar kaliya ama kasoo qaybgala dhacdooyinka dugsiga. Martida waxaa laga codsadaa inaay iska xaadiriyaan xafiiska dugsiga ama meesha laga xukumo, hadii aanay ahayn dhacdo la xiriirta ciyaaro, bandhig farshaxan iwl. Dhamaan martida waxaa lagu xukumayaa xeerka u yaala ee Degmadu dejisay (sharaxaada ka fiiri lifaaqa hoose).

Iskaa wax u qabso ku shaqeeye ahaan waxaan rabnaa inaad ogaata in Dugsiyada Dadwaynaha Seattle yihiin degmo balaadhan oo leh khayraad iyo caqabooyin badan. Ardayda aad caawinaysaa waxaa laga yabaa inaanay adiga kuu ekayn, heleena waayo aragnimo nololeed oo taada ka duwan. Qaar badan waxaa koriya hal waalid, ama waxay kusoo koreen guri danyar ah, oo waxay u baahan yihiin tacliin u khaasa.

Ujeedada barnaamijka tabaruca ee dugsiga

- Si loo caawiyo gaadhida himilada waxbarasho ee degmada, in laga caawiyo macalimiinta si ay u dhigaan xirfadaha hoose, si loo kobciyo qiimaha tacliinta, si kor loogu qaado waayo aragnimada isdhexgalka ardayda, iyo in la caawiyo shaqaalaha dugsiga.

- Si kor loogu qaado jacaylka araydu u qabto waxbarashada.

- In la caawiyo barnaamijka lagu yaraynayo ardayda dugsiyada ka tagaysa, tiiyoo lasiinayo gargaar waxbarasho oo khaasa.

- In la fahamsiiyo barnaamijyada dugsiyada ka socda dadka xiiseeya iyo ganacsatada iyo ururada bulshada ee nala shaqeeya.

- In la xoojiyo is dhexgalka fiican ee dugsiga, waalidka iyo bulshada.

- In la xoojiyo sida waalidku ula socdaan dugsiga tiiyoo la gargaarayo ururka waalidka iyo macalimiinta PTA, ururada bulshada iyo ururada waalidka.

- In kor loo qaado barnaamijyada waxbarasho ee degmada ee odhanaya yaan shaqada laga bedelin shaqaalaha degmada.

Ahaanshaha Tabaruce

In dugsi lagaga shaqeeyo iskaa wax u qabso waa arin cajiiba oo lagu helo waayo aragnimo, waxaanay wax u tartaa dugsiga iyo qofka iskaa wax u qabso ku shaqaynayaba. Waxaa loo sameeyey in lagu caawiyo xiriirka u dhexeeya ardayda, dugsiga iyo bulshada.

Qofka iskaa wax u qabso ku shaqaynayaa waa inuu noqdaa mid:

• Saaxiibtinimo leh oo daneeya.
• Laysku halayn karo oo jajaban.
• Fahma lana dhacsan shaqada ay shaqaalaha dugsiga iyo barnaamijka iskaa wax u qabsadu ka wadaan dugsiyada.

Qofka iskaa wax u qabso ku shaqaynayaa waa inuu hayaa:

• Dabeecad wanaagsan lana shaqayn karaa shaqaalaha dugsiga.
• Xiise uu kula shaqeeyo dadka da'da yar.
• Akhlaaq wanaagsan.
• Wakhti, rabaana inuu wax caawiyo.
• Waa inuu fahmaa muhiyada ay tacliintu ka ciyaarto nolosha caruurta iyo bulshadeena.

Fadlan maskaxda ku hay in iskaa wax u qabso oo aad ku shaqayso ay ku jirto inaad barato xirfado cusub iyo arday. Himilada dugsiga iyo himilada qofka iskaa wax u qabso ku shaqaynayaa waa in kor loo qaado heerka waxbarasho ee ardayda. Waxaan arintan ku meel marinaa dhowr nooc, waxbarid iyo gargaar shakhsi ah.

Inaad noqoto Tabaruce

Si aad u bilowdo inaad tabaruc ugu shaqaysho dugsiyada degmada, waa inaad:

1. Dugsiga iska diiwaan galisaa. Araajidu waxay yaalaan dugsigaaga ama Waaxda Maamulka Tabaruca. Hubi inaad siiso meesha lagaala soo xiriiri karo.

2. Soo buuxi soona saxeex arjiga u ogolaanaya dugsiga inuu Waaxda Denbi baadhista ee Washingon kasoo baadho wixii denbiya ee aad gashay. Nuqul ku saabsan wixii wara ee aan helona waan kusiin doonaa.

3. Ka qaybgal wixii tababaro iyo kulamo ah ee dugsiyada degmada iyo dugsiga lagugu qoray qabanayaan (haday jiraan).

4. Markasta oo aad dugsiga tagto waa inaad xafiiska iska xaadirisaa oo aad saxeexdaa magacaaga. (Tani waxay muhimad wayn u leedahay amaanka caruurta, waxaanay noo sahlaysaa inaan ogaano saacadaha aad joogto xaga caysmiska iyo warbixinta degmada dartii).

5. Xiro calaamada magaca tabarucaha markaad tabarucaysid.

Magacaaga halkan ku qor!

Calaamada Tabarucaha

Masuuliyada Tabaruceyaasha

1. Faham, aqbalna ardayda marka la eego isirkay kasoo jeedaan iyo waxay qiimeeyaan.

2. Caawi oo wixii ka dhiman ku dar barnaamijka waxbarasho ee macalimku fasalka ka dhigayo. Doorka tabarucuhu waa kalkaaliye maaha bare.

3. Si joogto ah ula xiriir macalimka, laybareeriyanka, ama iskuduwaha tabaruceyaasha dugsiga adoo la kulmaya, warqad u qoraya, telefoon ama email u diraya.

4. Ka qaybgal kulamada ama tabobarada lagaa rabo inaad tagto. Tabobarada waxaa loo qabtaa si aqoonta tabarucaha loo kobciyo.

5. Noqo mid dhakhsada, laysku halayn karo oo si joogto ah u yimaada dugsiga.

6. Aqoon iyo fiiro u yeelo dhamaan shuruucda dugsiga lagugu qoray (sida, daad guraynta dabka, warbixinta shilka, mudnaanta qadada iyo bunka, musqulaha ardayda, iyo mudnaanta cabitaanka, waxa la sameeyo marka hawadu xumaato).

7. Wixii dhibaato kula soo gudboonaata kala hadal macalimka, shaqaalaha maktabada ama iskuduwaha tabaruceyaasha dugsiga.

8. Hadii arday kuu sheego xaalad xad gudub oo lagu sameeyey u sheeg macalimka, shaqaalaha maktabada ama iskuduwaha tabaruceyaasha dugsiga. Shaqaalaha ayaa ka warbixin doona oo arinta dabogal ku samayndoona.

9. Wixii walwal iyo walaaca ee ku haysta guriga kaga kaalay. Wixii dhibaato ah ee aad dugsiga kala kulantana dugsiga ku dhaaf.

10.Ixtiraan wixii sira ee dugsiga idin dhexmara. Ogow in shaqada iyo habdhaqanka markuu ilmuhu dugsiga jooga ay yihiin wax sira.

11.Ogow inaad caruurta u tahay mid ku dayasho mudan, marka la eego sidaad ula dhaqanto shaqaalaha kale iyo dad nimadaad muujisaba.

Xaquuqda Tabaruceyaasha

Tabaruceyaashu waxay xaq u leeyihiin:

1. Inay dugsiga ka ogaadaan wax kasta oo ay u baahanyihiin, sida shuruucda, dadka iyo barnaamijyada dugsiga lagu hago.

2. Inay helaan tabobaro habaysan oo joogto ah oo ay ku kobciyaan aqoontooda. Inay si isdabajooga u helaan warbixino ku saabsan wixii tabobaro cusub ah ee soo kordha.

3. Inay ka helaan talo iyo hagid qof leh waayo aragnimo, sabir, fikir caafimaad qaba iyo wakhti uu cid ku hagi karo.

4.In laguu diro shaqo aad qaban karayso tiiyoo la eegayo waxaad rabto, adkaysigaaga, khibradaada, tacliintaada iyo shaqooyinkaag soo qabatay.

5. Khibrado kala duwan, tiiyoo aad u kala gudbinayso casharada kala duwan iyo layliyada kala duwan ee laguu diray.

6. In lagu maqlo oo aad qorshaha ka qaybqaadato, aad fikirkaaga si xora uga dhiibato, ixtiraam lagu tuso hadii aad fikir daacada oo nooc kale ah soo jeediso.

7. Waxaad xaq u leedahay in la tix galiyo waxqabad kaaga tiiyoo laguu muujinaayo maalin kasta, ama wax la taaban karo lagu siiyo; in laguu ixtiraamo sidood shaqaalaha ka mid tahay.

Talooyinka taborucayaasha

1. Sabir yeelo markaad ardayda la shaqaynayso. Isasii wakhti aad ku dejiso naftaada.

2.Magacyadu waa muhiim. Magaca ardayga ugu dhawaaq siduu jecelyahay in loogu dhawaaqo. Baro sida saxda ah ee loo qoro. Ilmaha bar magacaaga iyo sida loogu dhawaaqo.

3. Qof kasta si ixtiraamle ula dhaqee adiguna filo sidoo kale in laguula dhaqmo.

4. Tus inaad ardayga xiiso u qabto qof ahaantiisa, adoo dhagaysanaya waxay ku hadlayaan, uguna sheegaya weedho iyo ficilba.

5. Ardayga caawi kuna dhiiri geli inuu horumaro. U dhis kalsooni adoo si daacada u amaanaya. Ogow in dhaqaysi iyo juhdigu la midyihiin wax qabad. Waynee wixii wanaagsan, waxna ha kasoo qaadin wixii xun ee ilmuhu sameeyo.

6. Ka fogow inaad is barbardhig ku samayso ardayda, macalimiinta iyo dugsiyada.

7. Xasuusnow inaad markasta cadaalad samayso.

8. Ardaydu qaladbay sameeyaan. U sheeg in samaynta qaladku ka mid tahay habka waxbarashada. Adna hakabaqan inaad qalad samayso.

9.Noqo mid daacad ka ah siduu xaalad kasta u waajaho. Ardaydu way ku aamini markaad tahay mid daacada.

10. Hadii aad ka maqnaanayso shaqada, dugsiga soo wac oo u sheeg. Ardaydu way ku tabi hadaanad iman, wayse kuugu mahadin hadii aad soo wacdo.

Heerka Tacliinta

Sanadkii 1999 kii, Hogaanka Dugsiyada Seattle waxay dejiyeen heerka ama himilada waxbarasho ee afartan maado- akhris, qorid, hadal iyo xisaab. (heerka maadooyinka kale hadaa la wadaa samayntooda.)

Go'aanka aan ka gaadhnay heerka tacliinta laga rabo ardaygu waxay fariin cad u diraysaa ardayda iyo bulshada, fariintaa oo ah inaanu rumaysanahay in ardaydu gaadhi karaan himiladooda, oo aanu arki karno cabirina karno horumarkooda.

Faa'iidooyinka tacliinta ku salaysan heekan qeexan

Faa'iidooyinka ay ardayda u leedahay

- Ardayda waxaa si cad loogu qeexay heerka waxbarasho ee laga rabo fasal kasta oo ay dhiganayaan.
- Ardaydu waxay fahamsan yihiin waxay baranayaan iyo heerka waxbarasho ee ay la xiriirto iyo sababta ay u baranayaan.
- Ardaydu waxay ogyihiin habka macalimiintu ka rabaan inay u muujiyaan waxay barteen.
- Ardayda waxaa la siiyaa fursado badan oo ay dib ugu eegaan waxqabadkooda intaanay macalinka u gudbin – iyagoo isticmaalada miisaanka macalimiintu isticmaalaan.
- Horumarka ardayga waxaa lagu qiimeeyaa koboca waxbarasho ee uu sameeyey, lama barbar dhigo ardayda kale.
- Ardayda waxaa la siiyaa fursado baran si ay u muujiyaan inay gaadheen heerkii waxbarasho ee laga rabay (tiiyoo la isticmaalayo noocyo waxbarasho oo kala duwan).
- Ardaydu way ogyihiin in waxqabadkooda la qiimeeyo.

Faa'iidooyinka ay macalimiinta u leedahay

- Macalimiintu waxay ogyihiin xiriirka cashar kastaa la leeyahay Heerka waxbarasho ee Degmada iyo Gobolku ka rabaan ardayga.
- Macalimiintu waxay haystaan manhaj cad oo ay u raacaan siday wax u dhigaan, qeexayana waxqabadka ardayga laga rabo.
- Waxay macalimiinta u ogoshahay inay isticmaalaan xeelado waxbarasho oo kale si ay ardayga u gaadhsiiyeen heerka waxbarasho ee laga rabo.
- Waxay macalimiintu arkayaan juhdiga iyo kartida badan ee ardaydu muujiso.
- Waxay aad u cadaynaysaa habka imtixaanka looga qaado ardayda.
- Macalimiintu waxay helayaan fursado ay kula shaqeeyaan macalimiinta kale sababtoo ah waxbarida ayaa si fiican isula socota.

Faa'iidooyinka ay bulshada nala shaqaysa u leedahay

- Bulshada nala shaqaysaa waxay nala wadaagtaa luqada aan ku waajahayno xiriirka ay dugsiga la leeyihiin.
- Bulshadu waxay fahamsan yihiin meesha iyo sida ay waxqabadkooda ugu beegi lahaayeen baahidayada, si aan u kordhino, raadna ay ugu yeeshaan barnaamijyada aan bixino.
- Bulshada nala bahowday waxay xoriyad u leedahay siday barnaamijka ay wadaan u qorshayn lahaayeen uguna xidhi lahaayeen heerka waxbarasho ee ardayga laga rabo inuu gaadho
- Bulshadu waxay dugsiga ka helaysaa soo dhowayn badan, waayo dugsiyadu waxay ogaadeen baahida ay u qabaan gargaarka ay bulshada ka helaan si ay uga caawiyaan juhdiga ay ugu jiraan horumarinta tacliinta.
- Shakhsiyaadka wakhtigooda ku tabaruca si ay ardayda wax u baraan waxay leeyihiin manhaj cad oo ay u maraan siday ardayda ula shaqayn lahaayeen.
- Bulshada nala bahoowday waxay dareemayaan habsami u socodka ka dhexeeya dugsiyada.

Heerka waxbarasho ee aan higsanayno waxaa laga dareemi doonaa degmada oo dhan, oo ay ku jirto sidaad dugsiyada ula shaqayso. Aadbay kuu caawin doontaa hadaad wax ka ogaato heerka waxbarasho ee ann higsanayno iyo faa'iidodeeda. Warbixino dheeraada oo ku saabsan heerka waxbarasho waxaad ka heli kartaa madaxa dugsiga ama shabakada internetka ee Dugsiyada Dadwaynaha Seattle ee: http://www.seattleschools.org.

Arimaha amniga iyo masuuliyada

Halkeen ardayda kula shaqeeyaa?
Meelahaad ardayga kula shaqaynaysaa way kala duwan yihiin waxayna ku xidhan tahay meelaha banaan iyo meesha uu macalimku rabo. Dugsiyada badankoodu way buuxaan sidaa darteed waxaa laga yaabaa inaad ardayga kula shaqayso fasalka hortiisa. Isku day inaad hesho meel xasiloon oo aan lahayn qaylo badan.

Mararka qaarkood wuxuu macalimku ku dhihi ardayga kula shaqee fasal madhan. Hubi in albaabku furan yahay oo aad fadhiisataan labo kursi oo qofkii idin soo hor maraa arki karo. **Markasta kula shaqee meel dadka kale ku arki karaan.**

Hadii aad arday caawinayso marka dugsiga la xidho ka bacdi, waxaa laga yaabaa inaad istidhaa gurigiisa gee. **Waligaa ardayda ha u raacin meel dugsiga ka baxsan hana ku qaadin gaadhigaaga.** Tabarucaagu wuxuu ku egyahay dugsiga dhexdiisa kaliya.

Waa maxay xuquuqda aan u leeyahay inaan sirta xafido?
Marka ardayga aqoonta aad u leedahay sii korodho waxaa laga yaabaa inuu ku aamino. Waa inaad siiso wakhti aad ugu muujinayso inaad danaynayso xaaladooda. Laakiin ha u qaadin balan aanad kasoo bixi karayn. Hadii arday kuu sheego dhibaato xun oo lagu hayo, u sheeg inaad wanaagiisa doonayso laakiin aad arinta u sheegi doonto macalimka, la-taliyaha ama maamulaha dugsiga, oo ka caawin doona xalinta dhibaatada. Waxa laga yaabaa inuu jiro qof kale oo arinta si hoose ula socda oo ku fahamsiin kara si aad ardayga si fiican ula sii shaqayso.

Arimaha adiga kuu gaarka ah waxaad la wadaagi kartaa ardayga marka ay la xiriiraan shaqada aad ardayga la qabanayso. Ka fogow inaad siiso ardayga adarayskaaga, telefoonkaaga iyo emayl kaaga.

Ardayga hab ma siin karaa?
Ardaydu, gaar ahaan kuwa dugsiga hoose way ku soo dhowayn oo waxay kuu muujin jacayl. Waxaa laga yaabaa in ardaygu u hamuumo in la jeclaado, markaa waa inaad si sharafle arintan u xalisaa. **Inaad ardayga hab siisaa idinkoo iska soo horjeeda ma haboona, oo waa inaad ka fogaataa**. Markaa si taxadir leh gacantaada u saar garabka ilmaha oo dhinaca ka sii hab. Siyaabo kale u tus inaad jeceshahay, sida baabacadoo laysku dhufto, maskaxdana ku hay meelaha ay banaan tahay inaad ka taabato jidhka ardayga (hoos ka fiiri). **Ardaydu intay doonaan ha ahaadeene waa inaanay marna ku fadhiisan dhabtaata.**

Meelehee banaan inaan jidhka ardayga taabto?*

Meelaha ay banaan tahay inaad taabataa waa:

- Garbaha
- Dhabarka sare
- Gacmaha
- Baabacada

Maskaxda ku hay dhaqanka ardayga iyo siduu u arko taabashada. Waxaa raad ku leh dhaqanka, diinta iyo taariikhda ardayga soo martay heerka taabasho ee uu raalida ka yahay. **Ardayda qaar waxaa laga yaabaa inay neceb yihiin in la taabto oo ay rabaan boos shakhsi ah**; ixtiraam waxay rabaan. Guud ahaan, ardayda u taabo si isku mida.

***** Waxaa iman kara xaalado qasab ka dhigaya inaad xeerarkan jabiso. Tacliinta khaaska ah, kal-kaalihaha caafimaadka iyo tabobaraha kubada waxaa laga yaabaa in laga rabo inuu ilaaliyo xeerar dheeraada oo ku saabsan taaboshada ardayga tiiyoo la eegayo baahida caafimaadka iyo nadaafada ardayga. U cadee (naftaada iyo ardaygaba) wakhtiga, meesha iyo sababta aad u taabanaysid ardayga.

Waa maxay calaamadaha muujinaya inay suurto gal tahay in xad-gudub lagu sameeyey ardayga?

Waxa laga yaabaa in arimahan laga helo jidhka ardayga marka xad-gudub lagu sameeyey, mase ku koobna xad-gudub kaliya. Hadii aad calamadahan mid ka mida ku aragto jidhka ardayga **waxaa waajib kugu ah inaad u sheegto macalimka, maamulaha ama la-taliyaha si ay baadhitaan dheeraada ugu sameeyaan**:

- Calaamadaha dhaawaca, jidhdil, nabar, dilaac, gubasho, jabniin ama barar.
- Inay jiraan dhaawacyo soo noqnoqda oo aan la sharixin lana daawayn.
- Sheeko iska hor imanaysa sida “sariirtaan ka dhacay” iyo nabarka jidhka ka muuqda oo soo noqnoqonaya.
- In ilmuhu u muuqdo mid aan rabin inuu ka hadlo ama cabsoonaya markuu ka waramayo dhaawaca soo gaadhay.
- In ilmuhu ka hadlo ama ku mashquulo waxyaabo la xiriira galmood.

Waa maxay ujeedada xeerarkan?

Dugsiyada Dadwaynaha Seattle waxay doonayaan inaad shaqadiina tabaruce ahaan u qabsataan si habsami ah. Waxaan rabnaa inaad dareen wanaagsan ka qabto inaad hab siin karto ilmaha, adoo raacaya xeerarkan si aanay eedaymi kuugu iman. Waxaanan rabnaa inaan abuurno jawi bad qaba oo aad kula shaqaysid ardayda.

Lashaqaynta Ardayda Dhaqamada kala Duwan

Ardayda dhigata Dugsiyada Dadwaynaha Seattle waxay kasoo jeedaan qoysas, dhaqamo iyo bulshooyin kala duwan. Mid walibana wuxuu leeyahay waxyaabo u gaara oo ay rumaysan yihiin qiimeeyaana. Dhaqamadeena, waxaan rumaysanahay iyo waxaan qiimaynaa way inaga mid noqdeen, markaa mararka qaarkood way adagtahay in aan fahano dhaqamada kuweena ka duwan.

Ardayda kala duwan ee kasoo kala jeeda isirada kala duwan darteed, ardayda dhigata Dugsiyada Seattle waxay ku hadlaan luqooyin kala duwan, waxaanay haystaan diimo iyo dhaqamo kala duwan. Ardayda kasoo jeeda dhaqamadaasi waa inay la qabsadaan, tan macnaheedo waa inay bartaan labada dhaqanba. Qof kastaa waa inuu sharfaa dhaqankiisa iyo diintiisa, isagoo baranaya kana jawaabaya dhaqanka iyo xeerarka lagaga dhaqmo dugsiga.

Dhaqamada kala duwani waxay raad ku leeyihiin aqoonta saldhiga ah, habka ardaygu wax u barto, hab-dhaqanka iyo sida dadka loo dhexgalo. Khaas ahaan waxaa laga yaabaa inaad aragto faraq u dhexeeya markay timaado:

- Hababka kala duwan ee waxbarashada
- Isku dhowrida indhaha
- Qiimaha wakhtiga
- Anshax
- Dhiiranaanta ardayga
- Inta qofka loo jirsan karo iyo taaboshada ku haboon

Dhaqanka ardayga oo aad fahamto, kana caawiso siduu u fahmi lahaa dhaqanka dugsigu waxay kor u qaadi doontaa kartidaad ku caawin lahayd waxbarashada ardayga.

Liiska macluumaadka iyo habka tabaruca

Marka ugu horaysa ee aad la kulanto macalimka/horjoogaha arimahan kala hadal:

- Maalmaha iyo saacadaha aad fasalka/dugsiga ka shaqaynayso.
- Habka tabaruceyaashu ula xiriiraan macalimka/horjoogaha (kulan joogto ah, telefoon, xasuus qoraala, kulamo aan rasmi ahayn iwl).
- In qorshaha la badalo maalmaha aanu macalimku/horjooguhu shaqada iman.
- Habka macalimku/horjooguhu ugu sheegayo tabarucaha shaqada maalintaa uu qabanayo (ma galbaa lagu ridayaa, ma warqad baa lagu qorayaa mise hab kalaa loogu sheegayaa).
- Maxay ardaydu ugu yeedhayaan tabarucaha (dugsiga ama tabaruceyaashu ma waxay jecelyihiin in loogu yeedho magacooda mise Mr./Ms./Mrs.) Walxaha, habka wax loo dhigayo ama qalabka la isticmaalayo meesha laga helayo.
- Xeerarka macalimka/horjoogaha u raacayaan fasalka/dugsiga (nidaamka maamulka, xoojinta, dejinta qorshaha, habka loo marayo marka xaalad degdeg ahi dhacdo, meesha tabarucuhu uu dhigan karo qalabkiisa, iyo in tabarucuhu wax ku cuni karo qolka cuntada ee macalimiinta iyo ka ardayda).
- Taariikhaha lagaaga baahan yahay inaad tabobaroda ka qaybgasho.
- Hab maamuuska loogu sheego macalimka/horjoogaha/ardayda in tabarucuhu maalintaa shaqada ka baqan yahay.

Hadaad ardayga ka caawiso xaga tacliinta, waa inaad arimahan kala hadashaa:

- Wixii warbixina ee ku saabsan ardayga tabarucuhu la shaqynayo (tiiyoo loo marayo heerka xafidida sirta warbixinta aradayga).
- Wax yaabaha ardaygu ku fiican yahay.
- Wax yaabaha khaaska ah ee ardaygu u baahan yahay.
- Talooyinka u khaaska ah la shaqaynta ardayda (habkuu wax u barto iyo habka loo xoojiyo)
- Habka loo maro marka ardayga laga soo saarayo fasalka ee dibada wax loogu dhigayo.
- Meelaha loo qoondeeyey in ardayda lagula shaqeeyo.
- Qorshaha kale ee laraacayo hadii ardayga aad caawisaa aanu dugsiga joogin.

BUUGA SHAQAALAHA TABARUCA

Dugsiga lagugu qoray_____

Telefoonka dugsiga_____

Adarayska dugsiga_____

Maamulaha_____

Kalkaaliyaha dugsiga_____

Isku duwaha Tabaruca_____

Macalimka _____

Dadka kale ee lala xiriiro _____

Xasuus:_____
_____
_____
_____

Isku-duwaha tabaruca, macalimka ama hogaamiyaha dugsiga ayaa kaa caawin kara wixii su'aala ama dhibaato ah ee aad ka qabto meesha lagugu qoray.

Hadii aad furdaamin kariwaydo dhibaato khusaysa arday waxaad la xiriiri kartaa maamulaha dugsiga ama xafiiska Isku-duwaha tabaruca ee Waaxda Maamulka Tabaruca ee adarayskeedu yahay:

Volunteer Management Department
The Stanford Center
Mail stop: 32-150
PO Box 34165
Seattle, WA 98124-1165
206.252.0529
rmcglone@seattleschools.org

Waaxda Maamulka Tabaruca
Dugsiyada Dadwaynaha Seattle
Buuga Tabaruca

Heshiiska Tabaruca

Arimaha Amniga iyo masuuliyada

_____ Marka ardayga aqoonta aad u leedahay sii korodho waxaa laga yaabaa inuu ku aamino. Waa inaad siiso wakhti aad ugu muujinayso inaad danaynayso xaaladooda. Laakiin ha u qaadin balan aanad kasoo bixi karayn. Hadii arday kuu sheego dhibaato xun oo lagu hayo, u sheeg inaad wanaagiisa doonayso laakiin aad arinta u sheegi doonto macalimka, la-taliyaha ama maamulaha dugsiga, oo ka caawin doona xalinta dhibaatada.

_____ Arimaha adiga kuu gaarka ah waxaad la wadaagi kartaa ardayga marka ay la xiriiraan shaqada aad ardayga la qabanayso. Ka fogow inaad siiso ardayga adarayskaaga, telefoonkaaga iyo emayl kaaga.

_____ Ardaydu, gaar ahaan kuwa dugsiga hoose way ku soo dhowayn oo waxay kuu muujin jacayl. Waxaa laga yaabaa in ardaygu u hamuumo in la jeclaado, markaa waa inaad si sharafle arintan u xalisaa. **Inaad ardayga hab siisaa idinkoo iska soo horjeeda ma haboona**, **oo waa inaad ka fogaataa.** Markaa si taxadir leh gacantaada u saar garabka ilmaha oo dhinaca ka sii hab. Siyaabo kale u tus inaad jeceshahay, sida baabacadoo laysku dhufto. **Ardaydu intay doonaan ha ahaadeene waa inaanay marna ku fadhiisan dhabtaata.**

Lashaqaynta Ardayda Dhaqamada kala Duwan

_____ Ardayda dhigata Dugsiyada Dadwaynaha Seattle waxay kasoo jeedaan qoysas, dhaqamo iyo bulshooyin kala duwan. Mid walibana wuxuu leeyahay waxyaabo u gaara oo ay rumaysan yihiin qiimeeyaana. Dhaqamadeena, waxaan rumaysanahay iyo waxaan qiimaynaa way inaga mid noqdeen, markaa mararka qaarkood way adagtahay in aan fahano dhaqamada kuweena ka duwan. Dhaqanka ardayga oo aad fahamto, kana caawiso siduu u fahmi lahaa dhaqanka dugsigu waxay kor u qaadi doontaa kartidaad ku caawin lahayd waxbarashada ardayga.

Sir Laxafidayo

_____ Ardayda Dugsiyada Dadwaynaha Seattle dhigataa xaqbay u leedahay inay tabaruce kasta ka filato inuu sirtooda xafido. Golaha xeer dejinta ee Wadankan Maraykanduna waxay dejiyeen xeer laxiriira xafidaada sirta oo khuseeya macalimiinta, waalidka iyo ardayda oo la yidhaa Xeerka Xuquuqda Tacliinta Qoyska (loona soo gaabiyo “FERPA” ama “Buckley Amendment”)

☐Arday kasta oo aad la shaqaysaa xaqbuu u leeyahay inuu fisho in wax kasta oo ku dhaca ama isaga ku saabsan inaan lagala sheekaysan karin qof dugsigu u xilsaaray oo matalaya maamulka dugsiga mooyaane.

☐Waa inaanad sirta ardayga la wadaagin xataa kuwa si dhaba u danaynaya bad qabka ardayga sida shaqaalaha qaabilsan bulshada, hogaanka ururka dhalinta, wadaadka diinta, ayeeyo iyo awood, ama kalkaaliye caafimaad/dhakhtaro. Hadiise ay xaalad degdega oo daawayn u baahani timaado waad sheegi kartaa sirta si ardayga loo barbaadiyo. Markaa su'aalaha oo dhan waa inaad kula noqotaa qofka dugsigu u xilsaaray sida macalimka ardayga ama maamulaha dugsiga.

☐Waalidka, asaxaabta ama xubno ka tirsan bulshada ayaa laga yaabaa inay si daacada kuu waydiiyaan dhibaatooyinka haysta ardayga iyo horumarka uu samaynayo. **Mar labaad** waa inaad su'aalaha oo dhan u gudbixaa qofka dugsigu u xilsaaray inay xaliyaan. Waa inaanad sir ardayga ku saabsan la wadaagin xataa qoyskaaga.

☐Intaanad ka hadlin xasuuso in wadaaga sirta ardaydu tahay akhlaaq xumo, jabinaysa xeerka.

Heshiis

Ani, (Ku qor magaca) _____, oo ah tabaruce, waan akhriyey waanan ogolahay heshiiska kor ku xusan. Intaa waxa dheeraada, macluumaadka soo hadhay ee ku saabsan Buuga Tabaruca, waa la ii sheegay meesha aan ka heli karo Buuga Tabaruca iyo qofka aan la hadli karo hadii aad qabo wax su'aala ama cabasho ah.

_____ _____
Fadlan Magacaaga ku qor Meesha aad u tabarucdo

_____ _____
Fadlan saxeex Taariikh

_____ _____
Saxeexa Isku-duwaha Tabaruca Taariikh

Lifaaq

DABAQAD "A" TABARUC:

Tabaruceyaasha fasalka gala, ee ardayda sida tooska ah ula shaqeeya, ee laga yaabo inay ardayda wax ugu dhigaan xarun ka mida dhismayaasha degmada tiiyoo aan horjooge fiirinayn. Inta badan waxaa ardayda lagu caawiyaa fasalka dhexdiisa ama meel shaqaalaha kale kaa arki karaan, waxaase dhici karta inaad mar mar ardayda ku kaliyaysato, sida markaad fasalka hortiisa wax ugu dhigaysid, markay tabaruceyaashu ilaalinayaan dugsiga, iyo markay u raacaan socdaalada ardaydu dibada ugu baxdo (tabaruceyaasha ardayda u qaada socdaaladani waa inay iyaguna raacaan xeerarka Tabarucaha). Waalidka soo raaca ee aan caruurta kale horjooge ka ahaanina wuu hoos yimaadaa dabaqadan.

Dabaqada A Tabaruceyaashu waa inay:

1) Waa inuu damaanad qaadaa ama ansixiyaa dugsi ama shaqaale degmo;
2) Waa inuu buuxiyaa soona gudbiyaa Arjiga Tabaruca Dugsiga si loosoo ansixiyo;
3) Waa inuu isku-duwaha tabarucida ee dugsiga tusi karaa aqoonsi dawladu soo sartay oo sawirkiisu ku yaalo, sida (laysanka, baasaboor, aqoonsiga ciidamada), sii yaana wakhti lagaga soo baadhi karo xarunta danbi baadhista ee WATCH oo ku xidhan Xarunta Booliska Gobolka Washington;
4) Waa in xarunta danbi baadhista ee WATCH isku-duwaha tabarucu kasoo baadhaa in loo ogolyahay in tabarucuhu la shaqayn karo arday iyo in kale. Mararka qaarkood waxaa dhici karta in tabarucaha laga codsado in faraha laga qaado;
5) Waa inaad saxeexdaa buuga "Saxeexa Tabarucaha" ee yaala xafiiska hore ee dhismaha;
6) Waa inaad shaqada tabarucida qabataa adoo ka hoos shaqaynaya macalimka, isku-duwaha tabaruca dugsiga, iyo/ama maamulaha iyo kalkaaliyaha maamulaha;
7) Inuu raaco xeerka saxeexa dusgiga iyo xidhashada magaca aqoonsiga inta uu dugsiga ku sugan yahay. Waa inuu aqoonsiga magaca kusoo celiya xafiiska dugsiga dhamaadka maalinta ama dhamaadka xiliga tabaruca;
8) Tabaruceyaasha barnaamijka kobcinta tacliinta ku qabta dugsigu waa inay aqoonsiga macaga kaga tagaan xafiiska dugsiga markay baxayaan.

DABAQADA "B" TABARUCEYAASHU WAA:

Tabaruceyaasha wakhti badan la shaqeeya ardayda ee shaqaalaha degmadu horjooge u yihiin. Waxaa ka mida tabobaraha ciyaartoyga, kalkaaliyaha ciyaaryahanada dugsiga sare, bareyaasha sida khaaska ah wax ugu dhiga ardayda meelo ka baxsan dugsiyada oo aanay shaqaalaha degmadu horjeega ka ahayn. **Tabaruceyaasha barnaamijka kobcinta ku qabta meel aan dugsiga ahayn oo aan shaqaalaha degmadu qaybka ahayn ayaa hoos imanaya dabaqadan.***

Dabaqada B tabaruceyaashu waa inay:

1) Waa inay kafaala qaadataa ama soo ansixisaa maamulaha dugsiga ama qof matalaya maamulaha oo masuul ka ah iskuduba ridka dhacdooyinka tabaruca;
2) Inay soo buuxiyaan soona gudbiyaan si loo ansixiyo Arjiga Tabarucaha Dugsiyada. Xeerkan waxaa soo hoosgalaya dadka dhiga barnaamijyada kobcinta ee aan degmada u shaqayn. Araajida waxaa laga heli karaa shabakada internetka ee degmada: http://bit.ly/SPS-Volunteering;
3) Qabso balan faraha lagaaga dhigo; tabaruceyaasha cusubi waa inay soo wacaan **Waaxda Shaqaalaha (HR). Lacagta faraha hada lagu baadhaa waa $43.50**, marka uu tabarucuhu bixiyo waxaa loo dugbin doonaa waaxda Badbaadada iyo Amaanka si ay faraha uga qaadaan. Si aad balan uga qabsatid una ogaato saacadaha ay furan yihiin soo wax xafiiska HR **206.252.0215.** Tabarucuhu wuxuu u baahan yahay inuu soo qaato aqoonsi sawirkiisa leh oo aan dhicin oo dadwaladu siiyey (laysanka baabrurta, baasaaboor, aqoonsiga ciidamada);
4) U gudbi warqada danbi baadhista WATCH ee uu fuliyey **isku-duwaha tabaruca dugsiga** si loo fiiriyo in arjiiluhu yahay mid aan loo ogolayn inuu tabaruc ku shaqeeyo iyo in kale.
5) Tabarucaha dabaqada B ee faraha hore looga dhigay laguna hayo faylkiisa Badbaadada iyo Amaanka loogama baahna in sanadkiiba mar laga qaado faraha. Laakiin waa in danbi baadhista WATCH laga soo baadhaa sanad kasta. Waxa laga yaabaa in faraha looga qaado sanad dhaaf;
6) Tabaruce loosoo ogolaaday inuu ka shaqayn karo hal dugsi loogama baahna in lasoo baadho haduu dugsi kale rabo inuu tabaruc ka sameeyo. Dugsiyada danbe waxay cadayntiisa kasoo qaadan karaan dugsiyada hore ama Waaxda Maamulka Tabaruca ee 206.252.0529;
7) Waa inaad saxeexdaa buuga “Saxeexa Tabarucaha” ee yaala xafiiska hore ee dhismaha ;
8) Inuu raaco xeerka saxeexa dugsiga iyo xidhashada magaca aqoonsiga inta uu dugsiga ku sugan yahay; iyo
9) Inuu akhri oo saxeexo Buuga Tabaruca, fiidyaha badbaadana ka fiirsado internetka.

*__Ogow__: Dadka dugsiga meel ka baxsan ku bixinaya barnaamijka lagu kobcinayo aqoonta ardayda ee hayada ay u shaqeeyaan faraha ka dhigtay labadii sano ee ugu danbaysay dhexdooda, uma baahna in marlabaad faraha laga dhigo. Intaanay tabaruca samayn ka hor waa in hayada ay ka socdaan ay Waaxda Mamulka Tabaruca ugu soo gudbisaa qoraal magacooda iyo warbixinta faraha laga qaaday iyo natiijada bandibaadhistoodaa.

Dadka dibad bax habeen la dhaxayo ardayda u raacayaa waa:

Waalidka/wakiilka, tabarucaha ee ardayda layeelanaya xiriir dheer oo aan horjoogaha degmadu ilaalinayn. Dadka habeenka la dhaxaya ardayda qaarkood waxaa laga yaabaa in laga dhaafo faro ka dhigada.

1) Dhamaan dadka tabarucaa waa inay raacaan talaabooyinka ay hada u dejisey tabarucaha Dugsiyada Dadwaynaha Seattle, sida in danbi baadhis ay ku samayso hayada WATCH ee u qaabilsan Gobolka Washington;
   - Buuxi Arjiga Tabarucaha;
   - Buuxi Arjiga Baadhista;
   - U dir waaxda denbi baadhista ee Gobolka Waashington sanadkiiba mar;
   - Hadii lagaa dalbado, buuxi Arjiga Faraha lagaaga dhigayo;
   - Hadii lagaa dalbado, laxiriir xafiiska Badbaadada iyo Amaanka si loo bilaabo qaadista faraha;
   - Agaasimaha xafiiska shaqaalaha HR ayaa maamulaha dugsiga iyo tabarucaha ogaysiin doona natiijada faraha lagaa qaaday laga helay;
   - Tabarucaha waxaa soo ogaysiiya maamulaha dugsiga iyo agaasimaha HR;
   - Dugsigu waxay ogaysiiyaan waxay heleen Waaxda Maamulka Tabaruca.

2) Ka hor intaanu dugsigu banaanka u bixin ayaa laga rabaa inay Waaxda Maamulka Tabaruca u soo gudbiyaan magacyada dadka Tabarucaya ee loo ansixiyey inay u raacaan dibad baxa habeenka lagu dhaxayo.

3) Dadk ardayda u raacaya Dibad Baxa Habeen Dhaxa ee gobolka Washington ku noolaa **inka badan labo sano** looma baahna in faraha laga dhigo, xafiiska denbi baadhista WATCH oo soo xaqiijyaa ku filan;

- Cadayn ah inay labo sano oo xidhiidha deganaayeen Washington ayaa laga rabaa dadka raacaya ardayda habeenka dhaxaysa ee raba in laga dhaafo faro ka qaadista. Iskuduwaha tabaruceyaasha dugsiga ayaana cadayndoona isagoo fiirinaya (laysanka baabuurta, kirada guriga, caymiska, warqada cashuurta dhulka, ama jeega shaqad..);
- Waxaan ka codsanaynaa dugsiyada inay kusoo daraan lacagta faraha lagu qaadayo kharashka dibad u saarida ardayda, hadii ay jiraan dad raacaya oo looga baahan yahay in faraha laga dhigo;
- Qiimaha faraha lagaga dhigayo qofka tabarucaya waa $43.50. Waxaana dugsiyada laga rabaa inay ku daraan miisaaniyadooda loogu talo galay banaan u saarka ardayda laga bilaabo sanad dugsiyeed ka 2014-15.
- Dugsiyada ardayda dhigata badankoodu helaan Cunto Bilaasha ama Jaban (FRL>50) degmada ayaa bixin doonta lacagta faraha lagu dhigayo sanad dugsiyeedka 2013-14, mustaqbalkana wuxuu dugsigu ku dari doonaa miisaaniyada loogu tabo galay banaan u saarida ardayda;
- Dhamaan tabaruceyaasha waxaa laga rabaa inay akhriyaan saxeexaana Buuga Tabarucaha;
- Dhamaan tabaruceyaashu waa inay internetka Waaxda Tabaruca ka dhamaystaan maadada ku saabsan Ka hortaga Anshaxa Galmoodka Dadka Waayayn : http://bit.ly/SPS-Volunteering.;
- Dhamaan tabaruceyaasha waxaa laga rabaa inay akhristaan kuna dhaqmaan xeerka No. 3246 (Isticmaalida xoog ku haboon _ oo laga helayo shabakada Tabarucaha: http://bit.ly/SPS-Volunteering.

Dadka wadanka dibadiisa ardayda u raaca:

Waalidka/wakiilka, tabarucaha ee ardayda layeelanaya xiriir dheer oo aan horjoogaha degmadu ilaalinayn.

Dadka wadanka dibadiisa ardayda u raacaa waa inay:

1) Waa inay kafaala qaadataa ama soo ansixisaa maamulaha dugsiga ama qof matalaya maamulaha oo masuul ka ah iskuduba ridka dhacdooyinka tabaruca;
2) Inay soo buuxiyaan soona gudbiyaan si loo ansixiyo Arjiga Tabarucaha Dugsiyada. Xeerkan waxaa soo hoosgalaya dadka dhiga barnaamijyada kobcinta ee aan degmada u shaqayn. Araajida waxaa laga heli karaa shabakada internetka ee degmada: http://bit.ly/SPS-Volunteering;
3) Waa ina faraha lagaa dhigaa;
4) Waa inuu akhristaa soona saxeexaa Buuga Tabaruca;
5) Internetka ka fiirso maadaha ku saabsan Ka hortaga Anshaxa Galmoodka Dadka waawayn;
6) Soobuuxi danbi baadhaha WATCH ee sanad laha ah.

Shaqaaluhu intaanay u qalmin

Ururada shaqaalaysiiya dadku waxaa laga yaabaa inay shaqaalaha siiyaan fursad ay ugu tabarucaan Dugsiyada Dadwaynaha Seattle iyagoon soo marin baadhitaanka laga rabo inay soo maraan. Loo shaqeeyuhu waa inuu Waaxda Maamulka Tabaruca usoo gudbiyaa qoraal kusaabsan warbixinta danbi baadhista ee faraha shaqaalaha. Waaxda Maamulka Tabaruca ayaa gaadhi doonta go'aan ku saabsan aqbalida.

Ardayda Tabaruceyaasha ah

Ardayda dhigata fasalada K-12 ee u tabaruca dugsiyo aan kooda ahayn waxa laga rabaa kaliya inay soo buuxiyaan kuna soo celiyaan degmada Arjiga Tabarucaha Dugsiga.

Soo Booqde yaasha ama Martida

Booqde/marti waa qof aan lacag lasiin oo degmadu u ansixisay inuu dugsi u caawiyo si aan joogto ahayn ama kasoo qaybgala dhacdo dugsigu kafaalo qaadayo. Qof kani caruurta uma helayo wakhti uu ku kaliyaysto oo aan la kormeerayn. Tusaale ahaan waxaa dadkan ka mida martida ka socota barnaamijyada Read Across America, Principal-for-a-Day, kuwa ka hadla arimaha khayraadka, xubnaha dadka da'da waawayn ee wax ku soo bandhiga dugsiga, dhacdo halmar lagu qabto dugsiga ama fasalka oo aan ardayda la lahayn dhaqdhaqaad aan la kormeerayn, ama maalin kale ama dhacdo nooc kale ah. **Dabaqadan waxaa ka mida martida ka qaybgalaysa dhacdo lagu qabanayo dusgiga oo ah meel bulshada u furan**, meeshan oo shaqaale ama dad kale oo waawayni ay mar kasta ku arkayaan, marna caruurta aan lala kaliyaysanayn, markastana aad joogtaan meel shaqaale ama qof wayni idinka arkayo. Tusaale qofka fasalka dhexdiisa wax ku bara ardayda, iyo qofka barnaamijka ardayda lagu caawiyo galinka danbe ee shaqaale ka socda degmadu horjooge ka yahay caawiya, iyo kuwa aan fasalka la shaqayn ee xafiiska caawiya, iyo kuwa caawiya barnaamijyada ay qabtaan ururada la bahoobay dugsiga sida ururka macalimiinta iyo waalidka ee PTA, aasasaha dugsiga iyo Goobta Lataliyaha.

Waalidka caruuntooda kala soo qaybgala cuntooyinka lagu bixiyo dugsiga ama dhacdooyinka dugsiga lagu qabto sida "Habeenka Qoyska" waxaa loo aqoonsan yahay soo booqde yaal ama marti.

Booqde/Marti waa inay:

1) Waa inuu damaanad qaadaa ama ansixiyaa dugsi ama shaqaale degmo;
2) Waa inaad saxeexdaa buuga "Saxeexa Tabarucaha" ee yaala xafiiska dhismaha;
3) Waa inaad ku xidhataa meel muuqata magaca aqoonsiga inta aad dugsiga ku sugan tahay, waana inaad warqada aqoonsiga magaca kusoo celiyaa xafiiska dugsiga dhamaadka shaqada ama dhacdada.

Seattle Public Schools Volunteer Handbook revised: January 2014